

# Waxaad u Diyaar Noqotaa Shir Lagu Guuleysto

## SHIRKA KA HOR

- Wax ka ogow su'aalaha ilmahaaga uu qabo iyo waxyaabaha xagga dugsiga uu ka walwal qabo.
- Waxaad eegtaa warbixinta horumarka, kaarka darajooyinka iyo daruusta uu ilmahaaga aqalka u soo qaato.
- Waxaad qortaa liis su'aalo ah ee aad doonaysid in aad macallinka wax ka waydiisid. Waxaad ka billawdaa foomka buug gacmeedka ku yaal kaddibna wax ku dar. Liiska hore kulanka ugu soo qaado.
- Waxaad qortaa macluumaadka ilmahaaga ku saabsan ee ah in macallinku wax ka ogaado, sida geeri qoyska ku timid, furriin, isbeddel xagga dhaqaalaha, xanuun ama aqal cusub.
- Haddii aad u baahan tahay gaadiid, daryeel xanaano ama saacad ama maalin kale in shirka laga dhigo, dugsiga ayaa kaa caawini karo. Waxaad wacdaa xafiiska dugsiga oo waydii.
- Haddii af Ingiriis uusan ahayn luqaddaada hore, qof ha la xiriir dugsiga shirka waalidka-macallinka ka hor oo ha la waydiisto turjubaan ku caawiya xilliga uu kulanka jiro.

## SHIRKA

- Macallinka ha billaabo hadalka balse hubi in aad waydiisid su'aalaha liiskaaga ku yaal inta uusan waqtiga dhammaan.
- Waxaad waydiisaa macallinka waxa ilmahaagu tahay in ay ogaadaan oo ay sameyn karaan inta ka horreysa dhammaadka sanad dugsiiyeedka. Waxaad sameysataa qorshe ah sida adiga iyo macallinka aad ula shaqeyn kartaan ilmahaaga si ay u gaaraan ujeedooyinkan.
- Wax ka ogow qaabka ugu fiican (qoraallo, taleefoon, e-mail) iyo saacadda ugu fiican ee lala xiriiri karo macallinka inta lagu guda jiro sanad dugsiiyeedka.

# Xiriirkaasi Ha Socdo Sanadka oo Idil

## SHIRKA KADDIB

- Waxaad ilmahaaga kala hadashaa waxa uu macallinka kuu sheegay, gaar ahaan waxyaabaha fiican. Waxaad kala hadashaa ujeedooyinka waxbarashada waxaadna wada sameysataan qorshe aad ku wada gaartaan.
- Dabagal dhowrkii asbuucba qorshaha aad wada garteen ilmahaaga iyo macallinka.
- Maalin kasta waxaad ka eegtaa boorsada ilmahaaga daruusta dugsiga ee ah in aqalka looga shaqeeyo. Wada akhri. Haddii af Ingiriis uusan ahayn luqaddaada hore, waxaad waydiisaa qof qaraabo ama saaxib ah in luqaddaada kugu akhriyaan macluumaadka dugsiga uu kuu soo diro.
- Waxaad la xiriirtaa macallinka markasta ee aad su'aalo qabtid. Haddii ilmahaagu uusan ku hagaagsaneyn dugsiga, waxaad sameysaa jadwal jooqta ah ee aad macallinka kula eegaysid horumarka ilmahaagu sameeyo. Haddii af Ingiriis uusan ahayn luqaddaada hore, waxaad heshaa saaxib kaa caawiya sidii aad kula xiriiri lahayd macallinka ama aad turjubaan u waydiisan lahayd xafiiska dugsiga.
- Waxaad macallinka u dirtaa qoraal mahad-noq ah markii uu wax fiican ka dhaco fasalka.
- Waxaad hubisaa in ilmahaagu ogsoon yahay in dugsiga uu muhiim yahay. Maalin kasta waxaad ilmahaaga kala hadashaa dugsiga, waxaad ka qayb gashaa munaasibooyinka dugsiga, waxaad u soo jeedisaa in aad aqalka ku caawisid, si mutadawacnimo leh fasalka uga qayb qaado, waxaad ka mid noqotaa hay'adda waalidka.

## Office of the Education Ombuds (Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada)

155 NE 100th St.  
Ste. 210  
Seattle, WA 98125-8012

Khadka bilaashka ah: 1-866-297-2597  
FAAKIS: 206-729-3251  
[www.oeo.wa.gov](http://www.oeo.wa.gov)

## Waxaad la soo xiriirtaa (Office of the Education Ombuds) Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada haddii aad doonaysid in aad heshid dukumeentigan oo noocyo kale ah ee loogu talagalay dadka naafada ah.

(Office of the Education Ombuds) Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada waxaa uu siiyaa ardayda, qoysaska iyo bulshada macluumaadka ku saabsan nidaamka waxbarashada dadweynaha, waxaana ay dhiirigeliyaan ka qayb qaadashada waxbarashada ee qoysaska iyo bulshada, waxaana uu ka caawiyaa qoysaska iyo ardayda xal u helidda khilaafaadka dugsiyada ku saabsan.



## Aad Uga Faa'idayso Shirarka Waalidka-Macallinka Make the Most of Parent-Teacher Conferences

Xafiiska Sarkaalka Ashtakooyinka ee Waxbarashada  
Office of the Education Ombuds  
**Tilmaanta Qoysaska ee Ardayda Dugsiga Hoose**  
**A Guide for Families of Elementary School Students**



Gobolka Washington  
Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka  
State of Washington  
Office of the Governor

*We listen. We inform. We help solve problems.*

